



Xog-ururinta 2020-2021 ee Dugsiyada Guulaystay ee PPS waxa ay ururisaa jawaab-celinta ardayga, qoyska, iyo shaqaalaha PPS

Isniinta, Febraayo 8, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay bilaabi doonaan xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay ee sannadlaha ah taas oo noo ogolaanaysa inaanu inaanu ururino xog si aanu u gaadhno go'aano warbixin ku salaysan oo ku saabsan cimilada iyo dhaqanka dugsiyada. Daaqadda xog-ururintu waxa ay u shaqayn doontaa illaa Maarso 12 ardayda, shaqaalaha iyo hoggaamiyayaasha, waxana ay u shaqayn doontaa illaa Maarso 19 qoysaska.

Afar qaybood oo kamid ah bulshada PPS ayaa ka qayb qaadan doona xog-ururinta qarsoon: 1) ardayda ku jirta fasallada 3 illaa 12 waxa ay dabooli doonaan xidhiidhada macallinka-ardayga, dareen ka mid ahaansho, badbaadada iyo cimilada dugsiyada, ka qaybqaadashada, baraarugsanaanta dhaqan, iyo kala duwanaanshaha iyo ka mid ahaanshaha; 2) dhamaan qoysaska PPS waxa ay dabooli doonaan hagaagsanaanta dugsiyada, cimilada dugsiyada, carqaladaha ka qaybqaadashada, iyo badbaadada dugsiyada, 3) dhamaan shaqaalaha PPS waxa ay dabooli doonaan cimilada dugsiyada, xidhiidhada, waxbarista ardayda, caqliyadda koritaanka, xidhiidhada shaqaalaha-qoyska, iyo badbaadada dugsiyada, iyo 4) dhammaan hoggaamiyayaasha dhismaha pps waxa ay dabooli doonaan cimilada dugsiyada, xidhiidhada shaqaalaha-qoyska, xidhiidhada hoggaanka degmada, ka qaybqaadashada degmada ee guud, waxbarashada xirfadeed, jawaab-celinta iyo tababaridda, iyo ka qaybqaadashada shaqaalaha. Xog-ururintu waxa ay sidoo kale dabooli doontaa su'aalo dheeraad ah oo lagu xisaabinayo waxbarashada masaafadda ah ee dhamayska tiran sanadkan.

Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay waxa lagu dhamaystiri doonaa onlayn ahaan waxana laga dhigi doonaa mid lagu helayo linki. Ardayda waxa la siin doonaa linkiga, lambarka sirta ah ee ay ku galayaan iyo wakhti inta lagu gudo jiro maalin dugsiyeedka si ay u dhamaystiraan xog-ururinta. Qoysasku waxa ay xidhiidh ka heli doonaan dugsiyadooda iyaga oo ku helaya linkiga xog-ururinta. Hoggaamiyayaasha shaqaalaha iyo dugsiyada waxa ay heli doonaan linkiga xog-ururinadooda xiga. Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay waxa ay ku qaadan doontaa shakhsiyaadka celcelis ahaan 15-30 daqiiqo si loo dhamaystiro waxana lagu heli karaa Ingiriisi, Isbaanish, Raashiyaan, Soomaali, Fiitnaamiis iyo Jayniis. Nuqullada waraaqaha waxa diyaarin doona dugsi walba marka laga dalbado.

Su'aalaha ku saabsan Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay waxa lagu soo hagaajin karaa research@pps.net.

[Linkiga Xog-ururinta Qoyska](#)

